



Tallaallada COVID-19

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo

La cusbooneysiiyay: Agoosto 5, 2021



Waxaan hore u lahaa COVID-19. Miyaan weli u baahanahay tallaalka?

Haa. Difaaca aad ka samaysatay caabuqii hore ma sii joogi karo. Waxaa suurtogal ah in mar kale la qaado COVID-19. Isku tallaal laba qiyasood si aad u hesho difaac wanaagsan.



Tallaalkee ayaa wanaagsan?

Dhammaan tallaallada COVID-19 ee ay oggolaatay Health Canada waxay ka hortagaan cudurrada halista ah ee COVID-19.



Tallaalada mRNA ma la isku beddeli karaa?

Labada tallaal ee mRNA (Moderna iyo Pfizer) waxay isticmaalan tiknoolajiyad la mid ah, oo tallaalladu waa ammaan in la isku qaso. Waa muhiim inaad qaadato laba qiyasood si aad u hesho ilaalin ka sii wanaagsan oo muddo dheer ah.



Ma ammaan baa in la qaato tallaalka haddii aan qabo xaaladda difaaca jirka weerara iyo/ama xaalado caafimaad oo kale?

Haa. Malaayiin tallaalka COVID-19 ah ayaa la siiyay dadka qaba xaalado caafimaad oo kala duwan, sida wadne xanuunka, neefta, sonkorowga, arthritis-ka, kansarka iyo xubin beeridda. Tallaalku wuxuu ka ilaalin doonaa cudurka halista ah ee COVID-19. La hadal bixiyahaaga daryeelka caafimaadka haddii aad su'aalo qabtid.



Tallaalku ma u yahay badbaado dadka qaba xasaasiyad?

Tallaalka COVID-19 kuma jiraan ukun, gelatin, waxyaalaha ilaaliya ama antibiyootiko. Bixiyaha daryeelka caafimaadka ayaa kula eegi doona waxyaalaha tallaalka ku jira si loo hubiyo inay adiga badbaado kuu tahay. Tallaalka kadib, waa lagula socon doonaa wixii falcelin ah ugu yaraan 15 daqiico. Falcelin kasta waa la daaweyn karaa isla markiiba.



Tallaallada COVID-19

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo

La cusbooneysiyyay: Agoosto 5, 2021



Ma jiraan waxyeellooyin tallaal?

Dadka qaar ayaa yeelan kara waxyeellooyin fudud sida madax xanuun, qandho, qarqaryo ama xanuun goobta duritaanka ah. Waxyeellooyinka ayaa aad u badan kadib qiyaasta labaad. Falcelintu waxay socon kartaa 1 ilaa 3 maalmood. Wuxuu qaadan kartaa daawooyinka aan dhakhtar qorin ee tallaalka kadib si loo yareeyo calaamadaha.



Haddii aan isticmaalo daroogo ama aalkolo, ma badbaadaa in la i tallaalo?

Haa. Waa ammaan inaad qaadato tallaalka haddii aan isticmaasho daroogo ama aalkolo.



Kadib markaan qaato laba qiyaasood, ma ku laaban karaa waxqabadyada "caadiga ah"?

Dadka waxaa loo tixgeliyaa in si buuxda loo tallaaley 2 toddobaad kadib marka la siiyay tallaalkooda labaad ee COVID-19. Ilaa dad badan si buuxda loo tallaalo, sii wad inaad ka fogaato ugu yaraan 2 mitir dadka kale, xiro maaskaro markaad ku jirto meelaha dadweynaha ah ee bannaanka ah ama dibadda marka aadan ka fogaan karin oo gacmahaagana dhaq.



Waa maxay faa'iidooyinka tallaalka?

Maaddaama dad badan la tallaalo, kiisaska COVID-19 ayaa hoos u dhacaya, sidaa darteed qaar ka mid ah tallaabooyinka caafimaadka dadweynaha waa la qaadi karaa ganacsiyadunna dib ayay u furmi karaan. Tan micnaheedu waa inaan dhammaanteen ku laaban karno waxqabadyada aan ku raaxaysanno, oo ay ka mid yihin:

- U booqan karno si nabad ah xubnaha qoyska ama saaxiibbada nugul
- Socdaalka
- Ka -qaybgalka farshaxanka, madadaalada ama munaasibadaha isboortiga

Istallaalka ayaa sidoo kale hoos u dhigaya culayska saaran nidaamkeena caafimaadka marka qalliinnada iyo daaweynta kale ayaa dib u bilaaban karta.



Tallaallada COVID-19

Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo

La cusbooneysiiyay: Agoosto 5, 2021

Wixii maclumaaad dheeraad ah booqo toronto.ca/COVID19 ama ka wac Caafimaadka Dadweynaha Toronto lambarkan 416-338-7600.